

Xaashida Xaqiiqda ee Tallaalka MPOX

MPOX

MPOX (oo hore loogu yiqiin Monkeypox) waa fayras keena qandho, madax-xanuun, qanjidhada oo barara iyo daal, kadibna ay raacdo finan iyo nabarro maqaarka ah. Caadi ahaan waxa lagu kala qaadaa xidhiidh aad u dhow oo lala yeesho qof qaba MPOX.

Dulmarka Tallaalka

Tallaalka® Imvamune:

- Waxaa lagu ansixiyay Canada si loogu ilaaliyo MPOX.
- Waa ammaan wana waxtar
- Waxa la isticmaali karaa ka hor inta aan la qaadin fayraska (kahortagga-soo-gaadhista - PrEP) ama 14 maalmood gudahood ka dib marka la soo bandhigo (ka-hortagga-soo-gaadhista- PEP).
- Waxaa la siin karaa qof hore u qaatay tallaalka furuqa.
- Waxaa lagu duraa lakabka baruurta ee ka korreeya muruqa ee cududda.
- Jirka kagama tago nabarro sida noocii hore ee tallaalka furuqa.
- Wuxuu barayaa habkaaga difaaca inuu aqoonsado oo uu la dagaallamo fayraska MPOX.
- Waxay qaadataa laba toddobaad tallaalka ka dib inuu ku siiyo difaac.
- Waxa ku jira fayras la beddelay oo kuguma ridi karo jirro.

Tallaalku waa lacag la'aan weyna heli karaan dadka xaqa u lihi. Uma baahnid aqoonsi ID ama Kaar Caafimaad OHIP.

U-qalmitaanka Tallaalka

Iyada oo ku saleysan tilmaamaha Wasaaradda Caafimaadka ee Ontaariyo, hal qiyaas oo tallaalka ah ayaa la siinayaa kooxaha soo socda ee xaqa u leh:

- Kahortagga Soo-gaadhista ka Hor(PrEP):
 - a) Laba ruuxle, aan ahayn laba-jinsi, rag iyo dumar is beddelay ama isu-aqoonsaday inay jinsiga ay hadda yihiin u dhasheen ama leh lammaane galmo kuwaas oo isu aqoonsaday inay ka tirsan yihiin khaniisyada, labada jinsi iyo ragga kale ee la galmooda ragga ee bulshada (gbMSM) IYO ugu yaraan mid ka mid ah kuwan soo socda:
 - uu ku dhacay caabuqa galmada lagu kala qaado (STI) 2dii bilood ee la soo dhaafay, sida kalamiidiya, jabtada, ama waraabowga;
 - Dhowaan yeeshay 2 ama in ka badan oo lammaane galmo ah ama waxaa laga yaabaa inay qorsheynayaan;
 - Dhawaan ka qayb galay qolka qubeyska, naadiga galmada ama meel la mid ah oo galmo ama waxaa laga yaabaa in ay qorshaynayaan, ama tabaruc kaga shaqeeya goobahan;
 - Dhawaan yeeshay galmo qarsoodi ah/aan caadi ahayn ama waxaa laga yaabaa in ay qorshaynayaan, oo ay ku jiraan isticmaalka shukaansiga onlineka ama appkas hookup;
 - Ah xiriir galmo oo shaqsi ku lug leh shaqada galmada.
 - b) Shakhsiyaadka ku jira shaqada galmada ama laga yaabo inay qorsheynayaan.
 - c) Shakhsiyaadka ka tirsan qoyska ama lammaanaha galmoodka ee shakhsiyaadka buuxiya shuruudaha kor ku xusan IYO kuwa ah a) dhexdhexaad ilaa aad u daran AMA b) uur leh waxay heli karaan PrEP ka dib markay la tashadaan bixiyahooda daryeel caafimaad.

- Kahortagga Soo-gaadhista Kadib (PEP):
 - Dadka la ogyahay inuu soo gaadhay/xidhiidh dhow la yeeshay qof qaba MPOX waa inay qaataan tallaalka PEP ahaan 4 maalmood gudahood, laakiin waxay qaadan karaan ilaa 14 maalmood ka dib soo-gaadhista ugu dambeysa

Iyada oo ku saleysan tilmaamaha Wasaaradda Caafimaadka ee Ontaariyo, laba qiyaasood oo tallaalka ah ayaa la siin karaa oo ay u dhexayso 28 maalmood kooxaha xaqa u leh ee soo socda

- Shakhsiyaadka buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka Gobolka ee PrEP oo difaaca jirkoodu u dhexeeyo dhexdhexaad ilaa aad u daran. Warqad tixraac ahoo ka timid bixiye daryeelka caafimaad ama caddaynta daawada ayaa loo baahan yahay si loo helo qiyaasta labaad.
- Cilmi-baaris shaqaalaha shaybaadka ee si toos ah uga shaqeeya soo-celinta orthopoxvirus. Foomkan [la buuxiyey](#) waa in la helaa.

La xiriiir daryeel caafimaad bixiye ama Caafimaadka Dadweeynaha Toronto si aad u ogaatid inaad u qalantid PrEP ama PEP

Waxyeellooyin iyo khataro

Sida tallaalada kale, tallaalkani waxa uu keeni karaa waxyeellooyin qaar. Badankoodu waa kuwo khafiif ah ama dhexdhexaad ah, waxayna ku baxaan iskood 7 maalmood gudahood. Dhibaatooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah:

- Guduudasho, xanuun ama barar goobta la duray
- dareen daal
- Madax xanuun
- Muruq xanuun
- Lallabo

La xiriiir bixiye daryeel caafimaad ama u tag waaxda xaaladaha degdega ah ee kuugu dhow haddii aad leedahay mid ka mid ah calaamadahan ka dib qaadashada tallaalka:

- cuncun
- Barar wejiga ama afka
- Neefsashada oo dhib kugu haysa ama neefta oo kugu yaraata
- Laab xanuun ama wadne garaac

La hadal bixiye Daryeel Caafimaad ka hor inta aanad is tallaalin haddii aad:

- Xasaasiyad ka qaadid mid ka mid ah maaddooyinka [tallaalka](#) oo ay ku jiraan: Tris/tromethamine, bromobutyl, benzonase, chicken protein, egg, gentamicin and ciprofloxacin.
- La yeeshay falcelin halis ah nooc kale oo tallaaf furuq/MPOX.
- Aad qaadanaysid tallaalka Imvamune in ka yar 4 toddobaad ka hor ama kadib tallaaf kale.
- Aad ka yartay 18 jir.
- Aad uur leedahay ama aad naas nuujinaysid.
- Aad leedahay habdhis difaac oo daciif ah (ay ku jirto tallaaf xubin ama HIV oo leh tiro CD4 hoose/aan la garanayn).

Sug si aad u hesho tallaaf haddii aad leedahay astaamo COVID-19, iyo/ama lagaa rabo inaad gooni isu-go'moomisid.

Haddii aad u maleyneyso inaad leedahay MPOX, waa muhiim inaad isla markiiba is g'odoomisid oo aad la xiriirto bixiye daryeel caafimaad. Waqtigan, dadka haysta ama qaatay MPOX uma qalmaan tallaalka.

Wixii macluumaad dheeraad ah: La hadal bixiye daryeel caafimaad ama booqo toronto.ca/MPOX